War Saxaafadeed

Taariikhda: Maarso 21, 2019
La xiriir: Robert Oakes, Robert.S.Oakes@state.or.us, (503) 945-6331

Waaxda Adeegyada Dadweynaha Oregon Oo Ogeysiinaysa Jebinta Sharciga ee Xogta Dadweynaha

---

(Salem, Ore.) – Waaxda Adeegyada Dadweynaha Oregon ayaa ogaatay dhacdo macluumaad sharci darro ah lagu helayo 'phishing' oo saameysay diiwaannada e-mail-ka ee waaxda. Nasiib darro, Macluumaadka Caafimaad ee La dhawray sida uu dhigayo Xeerka Federaalka ee Haynta Macluumaadka Caafimaad iyo Masuuliyadda (HIPAA) ayaa la jebiyay waxaana suurtagal ah in la soo muujiyay.

Hay'adda ayaa shaqaaleysiisay hay'ad dibadda ka socota, IDExperts, si ay u sameyso dib u eegis dembi baaris si loo kala caddeeyo tirada iyo aqoonsiyada dadka reer Oregon ee macluumaadkooda la soo muujiyay, iyo noocyada macluumaad ee gaarka ah ee ku lug yeeshay.

Waaxda Adeegyada Dadweynaha waxay si dhab ah u qaadata gaar ahaanshaha iyo qarsoodinimada macluumaadka macmiilka waxayna leedahay nidaamyada dhanka ammaanka macluumaadka tiknoolajiyada oo adag oo jira, kaasi oo waaxda awood u siisay in ay ogaato isla markaana kaantaroosho dhacdada. Waaxdu ma xaqiijin karto in macluumaadka shakhsi ee macaamiisha laga helay nidaamkeeda email-ka ama loo isticmaalay si aan habbooneyn. Si kastaba ha ahaatee, waxay wargelinaysaa dadweynaha sababta oo ah macluumaadka waxay ahaayeen kuwo ay heli kareen qof ama dad aan loo ogoleyn.

Inkasta oo DHS aysan xaqiijin in macluumaadka shakhsi ee macaamiisha la helay intii lagu jiray dhacdada, DHS waxay u aragtaa dhacdada in ay tahay jebinta sharciga sida uu dhigayo Xeerka Ilaalinta Aqoonsiga La xado ee Oregon (ORS 646A.600 to 646A.628). Sidaa darteed, ogeysiintani waxaa qayb ahaan la bixiyay iyada oo ah ogeysiin beddel ah oo la xiriirta jebinta sharciga sida uu dhigayo Xeerka Ilaalinta Aqoonsiga La xado ee Oregon, sababta oo ah heerka macaamiisha ay saameysay waxay ka badan yihiin 350,000.

Xaqiiqooyinka jira waxaa lagu soo koobay hoosta, iyada oo ay weheliyaan tallaabooyin wax lagu ilaalinayo oo waaxdu qaaday tan iyo markii la ogaaday dhacdada iyo tilmaamo guud oo ku saabsan ilaalinta macluumaadka shakhsi.

Maxaa dhacay?

Bishii Janaayo 28, 2019 DHS iyo kooxda Xafiiska Ammaanka Internet-ka ee Enterprise ayaa xaqiijiyay in jebin la jebiyay macluumaadka nidaamsan ay dhacday. Sagaal qof oo shaqaale ah ayaa furay email macluumaad sharci darro ah lagu helayo 'phishing' waxayna riixeen meel la sii gelayay oo lagu jebsaday sanduuqyadoodii email-ka isla markaana saamaxday in la helo/gelo macluumaadka email-ka ee shaqaalahani. Macluumaadka hadda la hayo wuxuu tilmaamayaa Janaayo 8-deedii, in email macluumaad sharci darro ah lagu helayo 'phishing'loo diray shaqaalaha DHS. Iyada oo la adeegsanayo nidaamka wax lagu helo, waxaan ogaanay in ay 2 malyuun oo email ku jireen sanduuqyadan email-ka.

Gelitaanka aan la fasaxin ee ku aadan sanduuqyada email-ka ee ay saameysay ayaa lagu guuleystay in la joojiyo. DHS waxay ku gudda jirtaa in ay si buuxda dib ugu eegto dhacdada iyo macluumaadka ku lug yeeshay. Baaritaankani waxaa ka mid ah caddeynta tirada diiwaannada ay saameysay ee laga yaabo in ay ku jiraan macluumaadka macluumaadka shakhsi ee macaamiisha adeegyada ka helaya DHS.

Waa maxay macluumaadka ku lug yeeshay?

Macluumaadka Caafimaad ee La dhawray ee Macmiilka sida uu dhigayo Xeerka Federaalka ee Haynta Macluumaadka Caafimaad iyo Masuuliyadda (HIPAA) ayaa ahaa kuwo uu heli karey qof aan loo ogoleyn. Macluumaad macmiilka waxaa ku jiri kara magacyada hore iyo dambe, cinwaanada, taariikhaha dhalasho, lambarada Social Security-ga, lambarka kiiska iyo macluumaad kale oo loo isticmaalo in lagu maamulo barnaamijyada DHS.

Maxay sameynaysaa Waaxda Adeegyada Dadweynaha?

Ammaanka iyo qarsoodinimada macluumaadka shakshi waa mid muhiim u ah Waaxda Adeegyada Dadweynaha. Inkasta oo aanu jirin wax muujinaya in wax macluumaad shakhsi ah aanan laga koobi geraysan nidaamkeeda email-ka ama aan loo isticmaalin si aan habbooneyn, waaxdu waxay bixin doontaa adeegyada ka soo kabashada aqoonsiga la xado 'identity theft recovery' oo loogu talagalay dadka ay saameysay. DHS waxay ku gudda jirtaa go'aaminta dadka macluumaadkooda uu saameeyay sharcigan la jebiyay. Marka la xaqiijiyo, IDExperts waxay ogeysiin shakhsi ahaaneed u diri doonaan dadka la aqoonsaday, oo ay ku jiraan ogeysiin ku socota dadka macluumaadkooda ay dhawrtay HIPPAA ee wax ku lug yeeshay, oo ay la socdaan tilmaamo la raacayo oo ku saabsan sida la iskugu diiwaan gelinayo adeega, oo ay ku jiraan la socodka credit-ka oo lacag la'aan ah.

Ma u baahan tahay macluumaad dheeraad ah?

DHS waxay bixin doontaa macluumaad cusub marka macluumaad dheeraad ah la ogaado.

IDExperts waxay sameysay khadka bilaashka ah ee macluumaadka oo la heli doono ilaa Jimcaha (Maarso 22, 2019 ee (800) 792-1750 si macaamiisha DHS looga caawiyo macluumaadka dheeraadka ah. Waxaa sidoo kale jira website la sameeyay oo leh macluumaad http://ide.myidcare.com/oregonDHS

Macaamiisha DHS ee walwalka qabaa waxay la xiriiri karaan dhammaan hay'adaha warbixinta macaamiisha ee qaranka, oo uu ku jiro nuqulka/koobiga warbixinta credit-ka 'credit reports' oo cusub.

Equifax, TransUnion, iyo Experian
Website-ka: AnnualCreditReport.com
Telefoonka 877-322-8228 (Lambarka laga sii galayo ee 1)

Cinwaanka Boosta:
Annual Credit Report Request Service
P.O. Box 105281
Atlanta, GA 30348-5281

Joojinta credit-ka: Macaamiisha, oo ay ku jiraan, macaamiisha DHS ay suurtagalka tahay in ay saameysay, waxay ikhtiyaar u leeyihiin in ay si lacag la'aan ah u joojiyaan warbixintooda credit-ka. Waalidiintu waxay codsan karaan in ay joojiyaan warbixinta credit-ka ee macmiilka DHS ee da'diisu ka yar tahay 16 jir. Mas'uulka, qofka wax ilaaliya, ama qofka haysta awoodda qareen oo sax ah oo loogu talagalay DHS wuxuu sidoo kale codsan karaa joojinta warbixinta credit-ka ee macmiilkaasi DHS. Hoosta waxaa ku qoran macluumaadka la iskala xiriirayo ee dhanka joojinta ee shirkadda:

Equifax, (800) 349-9960 (Tooska ah, Lambarka laga sii galayo ee 1) ama (888) 298-0045 (Sida tooska ah)

TransUnion, (888) 909-8872 (Lambarka laga sii galayo ee 3)

Experian, (888) 397-3742 (Lambarka laga sii galayo ee 1 oo uu soo raaco Lambarka laga sii galayo ee 2)

Sida caadada ah, macaamiisha DHS waxaa lagu dhiirigelinayaa in ay aqoonsiga la xado ee la tuhunsan yahay u soo sheegaan saraakiisha dhaqangelinta sharciga, oo ay ku jiraan Xeer Ilaaliyaha Guud ee Oregon Qaybtiisa ee Ilaalinta Macmiilka iyo Guddiga Ganacsiga ee Federaalka

Macluumaadka dheeraadka ee ku saabsan sida loo soo sheego aqoosiga la xado iyo macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan ilaalinta aqoonsigaaga, booqo:

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Oregon Qaybtiisa ee Ilaalinta Macmiilka oo laga heli karo internet-ka: https://www.doj.state.or.us/consumer-protection/id-theft-data-breaches/data-breaches/

Macluumaadka macmiilka ee Guddiga Ganacsiga ee Federaalka oo ku saabsan Gaar ahaanshaha, Aqoonsiga & Ammaanka Internet-ka, oo laga heli karo internet-ka: https://www.consumer.ftc.gov/topics/privacy-identity-online-security

# # #